



SHARCI LR.011

OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDEKA DHOWRISTA  
MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA

Taariikh: 20 Maarso 2023

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

- MARKUU ARKAY:** Qodobka 87<sup>aad</sup>, Faqradda 1<sup>aad</sup> iyo Faqradda 2<sup>aad</sup> iyo 85<sup>aad</sup> ee Dastuurka KMG.
- MARKUU ARKAY:** Qodobka 90<sup>aad</sup>, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
- MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0239/B11/23**, ku taariikheysan **14/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada**.
- MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1<sup>aad</sup>**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Dhowista Maalgashiga iyo Maalgashatada.

**Qodobka 2<sup>aad</sup>**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



**Madaxweynaha J. F.S**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**





Federal Republic of Somalia  
House of the People  
Office of the Speaker

Tix: XGGSH/ 0239/B11/23:الرقم

Mogadishu, Maarso 14, 2023 التاريخ

**Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeedo: Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhowrista Maalgashiga Iyo Maalgashatada**

M.ne Madaxweyne;


Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee *Hindise Sharciyeedka Dhowrista Maalgashiga Iyo Maalgashatada* oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

*Hindise Sharciyeedka Dhowrista Maalgashiga Iyo Maalgashatada* wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd *Janaayo 26, 2023* wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG hindisahan ansixiyey *Maarso 1, 2023*, isla *Maarso 2, 2023* waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ku ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka *Maarso 13, 2023*.

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG kaaga codsanaynaa in *Hindise Sharciyeedka Dhowrista Maalgashiga Iyo Maalgashatada* ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Baad

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**  
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**




- Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
- Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
- Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
- Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
- Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
- Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.



**BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
GOLAHA SHACABKA**

**SHARCIGA DHOWRISTA MAALGASHIGA  
IYO MAALGASHATADA**

**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**



**M. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**

**Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka BJFS**



**Marwo Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar**

**Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Golaha Shacabka BJFS**

**M. Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow"**

Maarso 14, 2023

Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya  
Aqalka Sare  
Xafiiska Guddoomiye ku  
Xigeenka Koowaad



جمهورية الصومال الفيدرالية  
مجلس الشيوخ  
مكتب نائب الرئيس الأول

Federal Republic of Somalia  
The Upper House  
Office of The First Deputy Speaker

Ref: XGK1/19/B/20\_رقم:

Taariikh: 11/3/23 التاريخ:

- ✓ Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS  
Og:-Guddiga Arrimah Dibedda Aqlka Sare ee BFS  
Og:- Wasaaradda Qorsheynta X.F.S.  
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda  
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=  
=Muqdisho=  
=Muqdisho=  
=Muqdisho=  
=Muqdisho=

Ujeeddo:

Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada)

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay Tix: GAS/B-11/KF2/ /2023 kuna taariikheysan 11 Maarso 2023 kuna ansixiyay Goluhu Sharciga Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada:

- Waxaa codeeyay 28 Senatar.
- Waxaa oggolaaday: 28 Senatar.
- Waxaa diiday: 0 Senatar.
- Waxaa ka aamusay: 0 Senatar.

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

Sen. Cali Shacbaan Ibraahim  
Ku Xigeenka 1<sup>aad</sup> Ahna Kusimaha  
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya






**ANSIXINTA SHARCIGA DHOWRISTA MAALGASHIGA IYO  
MAALGASHATADA**


Senatarrada Codeeyay	Oggolaaday	Diiday	Ka Aamusay
28	28	0	0

**Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

  
Sen. Cali Shacbaan Ibrahim


Taariikh: 11 Mar, 2023

**Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

  
Sen. Cabdullaahi Cali Xirsi

Taariikh: 11 Mar, 2023

**Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ahana ku-simaha Xoghayaha Aqalka Sare  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

  
Cabdullaahi Xaaji Geeddi

Taariikh: 11 Mar, 2023

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**



**GOLAHA AQALKA SARE  
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**QARAAR GOLE  
ANSIXINTA SHARCIGA DHOWRISTA MAALGASHIGA IYO  
MAALGASHATADA**

**Muqdisho,  
11 Maarso. 2023**

Tix: GAS/B-11/KF2/ /23  
Kalfadhiga 2<sup>aad</sup>  
Kulankiisa 22<sup>aad</sup>

Taariikh: 11 Maarso, 2023

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

### MARKUU AKHRIYAY:

Sharciga **Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya una soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare **02 Mar. 2023** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

### MARKUU ARKAY:

**Qod.82<sup>aad</sup>** iyo **Qod.83<sup>aad</sup>** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.49<sup>aad</sup>** iyo **Qod.50<sup>aad</sup>** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

### MARKUU ARKAY:

**Qod.61<sup>aad</sup> (1) (3)** ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

### MARKUU TIXGELIYAY:

Soo jeedinta in Sharciga **Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada** lagu sameeyo toosin xagga qoraalka ah kadibna loo ansixiyo sida uu uga soo gudbay Golaha Shacabka ee B.F.S.

### MARKUU GAROWSADAY:

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga **Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada**

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga 2<sup>aad</sup>, kulankiisa 22<sup>aad</sup>, oo ay soo xaadireen  
29 Senatar (labaatan iyo sagaal Senator).


**WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:**

**Qod.1<sup>aad</sup>**

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Sharciga **Dhowrista Maalgashiga iyo Maalgashatada** isaga oo toosin xagga qoraalka ah lagu sameeyay, balse aan waxba laga beddelin.

**Qod.2<sup>aad</sup>**

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

  
Sen. Cali Shacbaan Ibrahim  
Ku Xigeenka 1<sup>aad</sup> Ahna Kusuraha  
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Aqalka Sare  
Guddiga Arrimaha Dibedda, Qorsheynta,  
Maal-gashiga iyo Iskaashiga Caalamiga



جمهورية الصومال الفيدرالية  
مجلس الشيوخ

لجنة الشؤون الخارجية ، التخطيط ، الاستثمار  
والتعاون الدولي

Federal Republic of Somalia  
The Upper House  
Committee for Foreign Affairs, Planning,  
Investment and International Corporation

Taariikh: 11 Maarso, 2023

Ku: Guddoonka Golaha Aqalka Sare

Ku: Xubnaha Golaha Aqalka Sare

**Ujeeddo: Soo jeedinta Akhrinta warbixinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Dhowrista  
Maalgashiga Iyo Maalgashatad**

Mudane Guddoomiye,  
Senatorrada sharafta leh,

Guddiga arrimaha Dibedda, Iskaashiga Caalamiga, Qorsheynta, Maal-gashiga iyo  
Horumarinta Dhaqaalaha ee Aqalka Sare ee **BFS** wuxuu Dhowrista Maalgashiga iyo  
Maalgashatada akhrintii 2aad ka hor akhriyay Aqalka Sare 8 Marso, 2023, iyada oo  
senatorrada sharafta leh ay soo jeediyeen talooyin wax ku ool ah.

Guddigu wuxuu dhegeystay talooyinkii iyo soo jeedinnadii wax ku oolka ahaa oo ay  
Sanatorradu u soo gudbiyeen Guddiga intii ay socotay dooddi akhrintii 2aad.

Guddigu marka uu dhegaystay tixgeliyana doodda iyo soo jeedinnada Senatorrada sharafta  
leh wuxuu go'aansaday in sidiisi hore loogo soo celiyo Golaha Aqalka Sare , iyada oo an  
wax-ka-beddel lagu sameyn.

## Senatorrada sharafta leh

Ugu dambeyn, waxaan si xushmad iyo qaddarin ku dheehan tahay idinkaga codsanaynaa in aad hindise-sharciyeedkan ku aqbashaan toosinta uu sameeyay Guddigu kuna ansixisaan sida uu yahay.

## Mahadsanidiin

  
Sen. Maryan Farah Kahiye  
Guddoomiye Guddiga





Ref: XGGSH/808 /B-11/23 /الرقم:

Mogadishu, March 02, 2023: التاريخ

- Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare.  
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.  
Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.  
Og: Wasaaradda Maaliyadda.  
Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda.  
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.  
Og: Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA  
MAALGASHADAYAASHA IYO MAALGASHIGA**

Mudane Guddoomiye,  
Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa, si aad waajibaadkiina uga gudataan Ansixinta Hindise Sharciyeedka Dhowrista Maalgashadayaasha Iyo Maalgashiga. Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan kalfadhigiisa 2aad, kulankiisa 24aad taariikhdu markay ahayd 1<sup>da</sup> Maarso 2023, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

Koramka: 147  
Oggol: 145  
Diiday: 0  
Ka aamustay: 2

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah



Marwo Sacdiya Yaasiin Xaari Farhatay  
Ku Simaha Guddoomiyaha ah  
Guddoomiye Ku Xigeenka laad ee Golaha Shacabka

**ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA**  
**MAALGASHADAYAASHA IYO MAALGASHIGA**

Tirada Xubnaha Codeysay 147:

Oggol: 145;

Diiday: 0;

Ka Aamustay: 2;

**Ku Simaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad Golaha Shacabka  
Baarlamaanka JFS**



Xil. Sacdiya Yaasiin Xaaji (Saxiib)



Tar: 02/03/2023

**Ku Simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka ahna Xoghaye Ku Xigeenka Golaha  
Shacabka**



M.ne Maxamed Cabdullaahi Cabdi - Ciyow



Tar: 02/03/2023



Ha la haday  
26/01/23

Tixraac:XRW/0039/01/2023

Taariikh: 19/01/2023

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

Ujeedo: - Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Dhowrista Maalgashadayaasha iyo Maalgashiga


Mudane Guddoomiye,

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.19.01.23 ee 19/01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Dhowrista Maalgashadayaasha iyo Maalgashiga" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbineynaa "Hindisaha sare ku xusan" si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah, waxa aan idinka codsaneynaa in aad fududeysaan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Dhowrista Maalgashadayaasha iyo Maalgashiga" oo baahi weyn loo qabo meel-marintiisa.

Wada Shaqeyn Wacan

Mudane. Saalax Axmed Jaamac  
Ku-simaha Ra'iisul wasaaraha, ahna Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS





Tixraac:XRW/0092/01/2023

Tariikh: 19/01/2023

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada  
Og: Guddoonka Golaha Shacabka JFS  
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=  
=Muqdisho=  
=Muqdisho=

**Ujeedo: - Go'aan Gole-Ansaxinta Hindise-sharciyeedka Dhowrista  
Maalgashadayaasha iyo Maalgashiga**

Ku-simaha Ra'iisul wasaaraha, ahna Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS,

Markuu arkay: Qodobka 99<sup>aad</sup> xarfaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100<sup>aad</sup> xarfaha(a),(d) iyo 101<sup>aad</sup> ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.19.01.23 ee 19 /01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Dhowrista Maalgashadayaasha iyo Maalgashiga" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu dalka u leeyahay iyo baahida loo qabo Hindise-sharciyeedka Maalgashadayaasha iyo Maalgashiga.


Wuxuu Meel-mariyey:

Oodobka 1<sup>aad</sup>

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.19.01.23 ee 19/01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Dhowrista Maalgashadayaasha iyo Maalgashiga" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2<sup>aad</sup>

In "Hindise-sharciyeedka Dhowrista Maalgashadayaasha iyo Maalgashiga" si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.



*Slab*  
Mudane Saalax Axmed Jaamac  
Ku-simaha Ra'iisul wasaaraha ahna, Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS



Federal Republic of Somalia  
Ministry of Planning, Investment and Economic Development  
Office of the Minister

Ref: WQM&HDH/XW/ 065 / 2022

Date: 27/12/2022

Ku: Ra'iisul Wasaaraha XFS  
MUQDISHO, SOMALIA

UJEEDDO: SOO GUDBIN HINDISO SHARCIYEEDYO

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxa ay, halkan si rasmi ah, kuugu soo gudbinaysa Hindiso Sharciyeedyada hoos ku xusan, si loo ansixiyo:

1. Hindise Sharciyeedka Hay'adda Dhiirigelinta Maalgashiga
2. Hidiso Sharciyeedka Dhawrista Xuquuqda Maagashatada iyo Maalgashiga iyo
3. Hindiso Sharciyeedka Hay'adaha aan Dowliga aheyn

Mudane Ra'iisul Wasaare, Sadexdaan hindiso sharciyeed oo uu horay u ansixiyay Golaha Wasiirada ayuu Golaha Shacabka dib ugu soo celiyay Xukuumadda maadama muddo xileedkii Golaha Shacabka uu dhamaaday ka hor inta aan la dhameystirin.

Mudane Ra'iisul Wasaare, baahi weyn ayaa loo qabaa meel marinta hindiso sharciyeedyadan si loo hagaajiyo jawiga maalgashiga shisheeye iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ee dalka isla markaana loo dhameystiro dhismaha Hay'adda Dhiirigelinta Maalgashiga oo ka mid ah shuruudaha deyn cafiska.

Mahadsanid,

*Mohammed*  
Xil. Maxamuud C. Sheekh Faarax (Booneboone)  
Wasiirka  
Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha





THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

**SUMMAD: XGG/012/2023**

**10/01/2023**

**Ku: Wasaaradda, Maalgashiga iyo H. Dhaqaalaha**  
**Og: Aggaasimaha Golaha Wasiirada**  
**Og: Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda J.F.S**

**Muqdisho**  
**Muqdisho**  
**Muqdisho**

**Ujeedo: Talo Sharci**

Garyaqaanka Guud ee Dowladdu, asagoo tixraacayo warqadda Summaddedu tahay WQM&HDH/70/2023, kuna taariikhaysan 01/01/2023, kana soo baxday Wasiirka Qoishaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, ujeedkeeduna ahayd soo gudbin Hindise-sharciyeedyada kala ah:

- 1- Hindise-sharciyeedka Hay'adda Dhiirgalinta Maalgashiga.
- 2- Hindise-sharciyeedka Dhowrista Xuquuqda Maalgashatada iyo Maalgashiga.

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladdu kaddib markii uu darsay Hindise-sharciyeedyada kor ku xusan waxaa u soo baxay in Hindise-sharciyeedaasi aysan ka horimaanayn Dastuurka, Shuruucda kale ee Dalka, waxa uuna ku talinayaa in la horgaykaro Golaha Wasiirada si dhammaystiro habraaca Xeer-dajinta Dalka.

Salaan qadarin leh

Dr. Cusmaan Cilmi Guuleed  
Garyaqaanka Guud ee Dowladda

*Cusmaan Cilmi Guuleed*





**JUMHUURIYADDA FEDERAALKA  
SOOMAALIYA**

**GOLAHA SHACABKA**

**HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA  
MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA**



Tusmo:

<b>CUTUBKA 1AAD.....</b>	<b>3</b>
<b>QODOBBO HORUDHAC AH .....</b>	<b>3</b>
<i>Qodobka 1aad.....</i>	<i>3</i>
<i>Magaca Sharciga .....</i>	<i>3</i>
<i>Qodobka 2aad.....</i>	<i>3</i>
<i>Mabda'a Guud.....</i>	<i>3</i>
<i>Qodobka 3aad.....</i>	<i>3</i>
<i>Erey bixin.....</i>	<i>3</i>
<i>Qodobka 4aad.....</i>	<i>4</i>
<i>Ujeedada Sharciga .....</i>	<i>4</i>
<i>Qodobka 5aad.....</i>	<i>4</i>
<i>Baaxadda Sharciga .....</i>	<i>4</i>
<b>CUTUBKA 2AAD.....</b>	<b>5</b>
<b>HABKA LAGU DHAQAYO MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA.....</b>	<b>5</b>
<i>Qodobka 6aad.....</i>	<i>5</i>
<i>Nidaam maamul oo ku dhisan Cadaalad iyo Sinnaan.....</i>	<i>5</i>
<b>CUTUBKA 3AAD.....</b>	<b>5</b>
<b>YAGLEELIDDA IYO ILAALINTA MAALGASHIYADA.....</b>	<b>5</b>
<i>Qodobka 7aad.....</i>	<i>5</i>
<i>Yagleelka Maalgashiga (Establishment of Investments).....</i>	<i>5</i>
<i>Qodobka 8aad.....</i>	<i>5</i>
<i>Kala-sooc la'aanta Maalgashatada (Most Favoured Nation (MFN) Treatment).....</i>	<i>5</i>
<i>Qodobka 9aad.....</i>	<i>6</i>
<i>Hab-dhaqan Siman (National Treatment).....</i>	<i>6</i>
<i>Qodobka 10aad.....</i>	<i>6</i>
<i>Dammaanad qaadka maalgashi .....</i>	<i>6</i>
<i>Qodobka 11aad.....</i>	<i>6</i>
<i>Dhowrista Sharci ee xuquuqda Maalgashiga. (Legal Protection of Investment).....</i>	<i>6</i>
<i>Qodobka 12aad.....</i>	<i>6</i>



<i>Soo gelinta iyo La Bixidda Lacagaha iyo Maalgashiga</i> .....	6
<i>(Funds Transfer and Repatriation of Investments)</i> .....	6
<b>CUTUBKA 4AAD</b> .....	7
<b>QARAMAYNTA</b> .....	7
<i>Qodobka 13aad</i> .....	7
<i>Qaramayn (Expropriation)</i> .....	7
<i>Qodobka 14aad</i> .....	8
<i>Awoodda soo-saarista xeernidaamiye (Sovereign Right to Regulate)</i> .....	8
<b>CUTUBKA 5AAD</b> .....	8
<b>MAARAYNTA CABASHADA IYO XALLINTA KHILAFAADKA</b> .....	8
<i>Qodobka 15aad</i> .....	8
<i>Maaraynta Cabashooyinka</i> .....	8
<i>(Grievances Management)</i> .....	8
<i>Qodobka 16aad</i> .....	8
<i>Xallinta Khilaafaadka</i> .....	8
<b>CUTUBKA 6AAD</b> .....	9
<b>QODOBO ISKU DHAFAN</b> .....	9
<i>Qodobka 17aad</i> .....	9
<i>Xeer-Nidaamiyeyaasha</i> .....	9
<i>(Regulations)</i> .....	9
<i>Qodobka 18aad</i> .....	9
<i>Iska-Hor-imaadka Sharciyada</i> .....	9
<i>Qodobka 19aad</i> .....	9
<i>Qodobbada Kala-guurka</i> .....	9
<i>Qodobka 20aad</i> .....	9
<i>Dhaqangalka Sharciga</i> .....	9



**CUTUBKA 1AAD**  
**QODOBBO HORUDHAC AH**

**Qodobka 1aad**  
**Magaca Sharciga**

Sharcigan waxaa loogu yeerayaa Sharciga Dhawrista Xuquuqda Maalgashiga iyo Maalgashatada.

**Qodobka 2aad**  
**Mabda'a Guud**

Mabda'a Guud ee Sharcigan waa Ilaalinta maalgashiga iyo maalgashatada si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda dalka

**Qodobka 3aad**  
**Erey bixin**

Inta lagu guda jiro Sharcigan, haddii aan si kale loo dhigin:

1. **“Dastuur”** waxaa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. **“Khilaaf”** Waxaa loola jeedaa isfaham u-dhaxeeya dowladda iyo maalgashade ama maalgashatada dhaxdooda kaa soo lagu xalin doono shuruucda dalka si waafaqsan qodobka 16aad ee Sharcigan;
3. **“Maalgashi toos ah”** waxaa loola jeedaa maalgashi, ha ahaado mid keli ah ama kuwo la isu geeyay, mid cusub, mid hore u jiray, kaa oo u saamaxaya maalgashade ama koox maalgashata ah inay sameeyaan, helaan ama ku yeeshaan saami ganacsi faaiido doon ah;
4. **“Shirkad”** waxaa loola jeeda unug kasto oo ku hawlan dano ganacsi oo rasmi ah kana diiwan gashan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
5. **“Jamhuuriyadda Federaalka”** Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
6. **“Maalgashade shisheeye”** waxaa loola jeedaa shirkad ama qof shisheeye ah taasoo Hanti-maalgashi ku sameeyay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa sidoo kale soo galaya qof Soomaali ah oo Maalgashigisa ku diiwan gashaday/gashatay dhalasho shishiye;
7. **“Tabasho”** waxaa loola jeeda dhibaato uu ka cabanayo maalgashade/maalgashato;
8. **“Xarunta Caalamiga ah ee Xallinta Khilaafaadka Maalgashi”**- waa Hay'ad caalami ah oo madax bannaan taas oo ku hawlan xalinta khilaafaadka caalamiga ee maalgashi;
9. **“Maalgashade”** waxaa loola jeedaa maalgashade dalka u dhashay ama shisheeye ah;
10. **“Faa'iido joogta ah oo lagu leeyahay”** waxaa loola jeeda lahaanshiyaha ugu yaraan boqolkiiba 10 awoodda codaynta shirkad ganacsi ama wax la mid ah oo lagu yeesho ganacsi aan shirkad ahaan u abaabulnayn.
11. **“Maalgashade dalka u dhashay”** waxaa loola jeeda Muwaadin soomaaliyeed oo maalgashaday Dalka;
12. **“Talaabo/Go'aan Dowladeed”** waxaa loola jeeda talaabooyin ama Go'aano Dowladda soo saartay oo saameynaya maalgashade ama maalgashagiisa;
13. **“Wasiir”** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Soomaaliya;



14. **“Wasaarad”** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;
  15. **“Damaanadda Maalgashi ee Dhinacyada-badan”** damaanadda caymis ee ay bixiso Hay’adda Damaanadda Maalgashi ee Dhinacyada-Badan. (Multilateral Guarentee Agency-MIGA);
  16. **“Tilmaan”** waxaa loola jeedaa talo lagu bixiyay hanaan xeer-nidaamineed;
  17. **“Dib u la noqosho”** waxaa loola jeedaa maalgashade hantidiisa kala baxaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
  18. **“Xeer-nidaamiye”** waxaa loola jeedaa xeerar ka dhasha sharcigan;  
**“Xukuumadda”** – waxaa loola jeedaa Dowladda Federaalka Soomaaliya;
  19. **“Sharcigan”** waxaa loola jeedaa Sharciga Dhawrista Maalgashiga iyo Maalgashatada, 2023.
  20. **“Sharcigan”** waxaa loola jeedaa Sharciga Dhawrista Maalgashiga iyo Maalgashatada, 2023. Sharcigan waxaa loo fasirayaa, loona dhaqan-galinayaa si waafaqsan:
    - (b) Dastuurka iyo shuruucda maalgashiga ee dalka;
    - (t) Axdiyada iyo heshiisyada maalgashiga ee caalamiga ah ee xubinta ay ka tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- “Qarameyn dadban”** waxaa loola jeeda talaabo kasto oo ay qaado dowladdu taasoo si aan toos aheyn ugu yeelato saameyn hantida maalgashade;

**Qodobka 4aad**  
**Ujeedada Sharciga**

- 1) Sharcigaan wuxuu Ilaalinaya xuquuqda maalgashatada iyo maalgashigooda si waafaqsan **qodobka 26aad ee Dastuurka** iyo shuruucda dalka isla markaana wuxuu dhiirigalinaya in dalkeena la maalgashado, iyadoo loo marayo qaab isu dheelli tiraya danaha guud ee xuquuqda iyo wajibaadka maalgashatada.
- 2) wuxuu Sugaya xaqqa madaxbanaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u leedahay inay u nidaamiso maalgashatada si waafaqsan danta guud.
- 3) Hubinta xuquuqda dastuuriga ah ee ku cad Dastuurka iyo shuruucda khuseeya maalgashatada iyo maalgashiyada Jamhuuriyadda Federaalka; iyo
- 4) Xoojinta shuruucda iyo xeerarka dhaqangalka ah ee khuseeya maalgashiyada iyo arrimaha xiriirka la leh.

**Qodobka 5aad**  
**Baaxadda Sharciga**

Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa:-



- (b) Dhammaan maalgashiga ka jira iyo kuwa laga abuuri doono dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee loo sameeyay si waafaqsan Shuruucda dalka.
- (t) Dhammaan maalgashiga ka dhasha heshiisyada caalamiga ah ee dhinacyada badan iyo kuwa laba-geesoodka ah ee ay qayb ka tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- (j) sido kale sharcigaan wuxuu nidaaminayaa dhamaan heshiisyadda maalgashi ee gudaha JFS
- (x) Xukuumada Federaalka Soomaliya waxa ay soo sareysa siyaasado lagu jaan gooynta xadiga, baaxadda iyo qeybaha hortabinta u leh maaalgashiga shisheeye.

## CUTUBKA 2AAD

### HABKA LAGU DHAQAYO MAALGASHIGA IYO MAALGASHATADA

#### Qodobka 6aad

##### Nidaam maamul oo ku dhisan Cadaalad iyo Sinnaan

- 1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa ay dejineysa nidaam maamul oo ku dhisan cadaalad iyo sinnaan oo ay u siman yihiin maalgashatada dalka udhashay iyo kuwa shisheeyaha ah sida ay tilmaamay shuruucda iyo xeerarka dalka.
- 2) Dawladda Soomaaliya waxay u samaynaysaa garsoor cadaalad ah oo ay u simanyihiin maalgashiga/maalgashatada dalka, si waafaqsan shuruucda dalka dhaqan galka ka ah.
- 3) Dawladda waxay dejineysaa habraacyo ay ku hubinayso go'aan qaadasho sababeysan ee maamul iyo garsoor kuna salaysan cadaalad iyo sinnaan, iyadoo ay qayb ka yihiin maalgashadayaasha dalka u dhashay iyo kuwa shisheeyaha ah.
- 4) Maalgashatada shisheeye iyo kuwa wadaniga ah waxey xaq u leeyihiin in ay si siman u helan xogaha maalgashi iyo fursadaha ganacsi ay dowladdu hayso.
- 5) Hadii khilaaf yimaado, maalgashatada iyo wixii la-xiriira maalgashiyadooda, waxay xaq u yeelanayaan in loo maro go'aan-ka-gaaristooda hab-dhaqan ku dhisan shuruucda dalka, dhagaysi daahfuran, cadaalad ku salaysan, oo maxkamad ka dhaca, ama, xaaladaha ay ku haboonaato, maxkamad gaar ah ama wadiiqo kale oo madax bannaan oo aan dhinacna u jan-jeerin.
- 6) Sababaynta iyo go'aannada maamul ee ku xusan faqradda (3) ee kore waxaa lagu bixinayaa qaab qoraal ah.
- 7) Dawladda waxay u sugaysaa amniga maalgashatada shisheeye iyo hantidooda si waafaqsan shuruucda maalgashiga ee wadanka iyo xeerarka caalamiga ah, iyadoo la tix-galinayo awoodda dhaqaale iyo mida tayo ee suurtagalka ah.

## CUTUBKA 3AAD

### YAGLEELIDDA IYO ILAALINTA MAALGASHIYADA

#### Qodobka 7aad

##### Yagleelka Maalgashiga (Establishment of Investments)

- 1) Dhammaan maalgashiga waxaa loo yagleelayaa si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dhaqan-galka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- 2) Maalgashiga aan waafaqsanayn faqrada laad ee qodobkan, dalka kuma yeelanayo xuquuqda maalgashiga shisheeye.
- 3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lagama yagleeli karo maalgashi kasta oo kahor imaanaya Diinta, dhaqanka/hiddaha ama saameyn taban ku yeelanaya deeganka iyo cimillada.
- 4) Maalgashatada shisheeye waa inay u hogaansamaan xeerarka shaqaaleysiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed, mana shaqaaleysiin karaan shaqaale ajnabi ah oo aan ku imaan baahi aqooneed ama



mid xirfadeed.

### **Qodobka 8aad**

#### **Kala-sooc la'aanta Maalgashatada (Most Favoured Nation (MFN) Treatment).**

- 1) Iyadoo loo hogaansamayo Dastuurka iyo shuruucda maalgashiga dalka iyo xeerarka caalamiga ah, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sinnaba looma takoori karo maalgashatada shisheeye.
- 2) Faqrada laad ee Qodobkan ma khusayso heshiisyada ay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay la gasho, dawlado iyo ururro calami ah, sida midow canshuur, heshiis canshuur dhaaf dhaqaale, ama mid lacageed, suuq furan, ama aagagga-dhaqaale ee xorta ah.

### **Qodobka 9aad**

#### **Hab-dhaqan Siman (National Treatment)**

- 1) Maalgashatada shisheeye iyo maalgashigooda waxaa loola dhaqmayaa si la mid ah maalgashatada Soomaaliyeed.
- 2) Mar kasta waxaa la tix galinayaa:
  - (b) xajmiga uu leeyahay maalgashiga.
  - (t) qaybta dhaqaale ee uu maalgashigu ku wajahan yahay.
  - (j) saameynta togan ama taban ee uu maalgashiga ku leeyahay bulshada, deegaanka, shaqooyinka si toos ah iyo si dadban.
- 3) Qiimayntuna waa inaysan ku koobnaan keliya xaaladaha ku xusan Faqradda (2) ee qodobkan.

### **Qodobka 10aad**

#### **Dammaanad qaadka maalgashi**

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay dammaanad qaadaysa bad-qabka iyo amniga maalgashatada shisheeye iyo maalgashigooda si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

### **Qodobka 11aad**

#### **Dhowrista Sharci ee xuquuqda Maalgashiga. (Legal Protection of Investment)**

Maalgashatada shisheeye waxa ay xaq u leedahay in ay ku yeelato hanti (guurto ama ma guurto ah) gudaha dalka si waafaqsan qodobka 43aad ee Dastuurka iyo shuruucda dhaqangalka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### **Qodobka 12aad**

#### **Soo gelinta iyo La Bixidda Lacagaha iyo Maalgashiga (Funds Transfer and Repatriation of Investments)**

- 1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa suuq furan oo xor ah, Maalgashatada shisheeyana waxa ay dalka soo galin karaan, Lana bixi karaan hanti maalgashi si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalka.
- 2) Hantida la soo galinayo ama laga saarayo dalka waxay noqon kartaa:
  - (b) Midda dalka la so galinayo:
    - i. Mid lagu yagleelayo maalgashi cusub.
    - ii. Mid Lagu horumarinayo ama lagu ballaarinayo maalgashi jiray.
  - (t) Midda dalka laga saarayo:
    - i. Faa'iidada maalgashiga,



- ii. Dakhli hanti la iibiyay, lil tirka (**liquidation**) dhammaan ama qayb maalgashi,
  - iii. Bixin kharashyada ama daymaha heshiisyada dibadda,
  - iv. Mushaaraadka iyo xuquuqaha kale ee ajaanibtu ku yeeshaan maalgashiga,
  - v. Lacagaha lagu mutaysto magdhaw la xiriira qaramaynta maalgashiga, si waafaqsan Qodobka 13 ee Sharcigan
  - vi. Lacagaha loo qaato magdhaw lagu bixiyay khasaaro uu la kulmay maalgashade.
  - vii. Lacagaha lagu kala qaato xallinta khilaafaadka, si waafaqsan Qodobka 16 ee Sharcigan
  - viii. Lacagaha lagu bixiyo daymo heshiis ku salaysan taas oo lagu leeyahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lacagahaas, loona shubayo maalgashade shisheeye
  - ix. Lacagaha kale ee ku tilmaaman sharciyo gaar ah ama xeer-nidaamiyeyaal dhaqangal ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- 3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay qaadan kartaa talaabooyin ay ku xadidayso ama hakineyso dirista ama la bixista lacagaha sida:
- (b) Hadii ay jirto Xaalad dhaqaale iyo midda maaliyadeed oo khasbeysa xaddidaad noocaas ah;
- 4) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo tix-raaceyso arrimaha ku xusan faqrada 3 (b), waxay u maraysaa qaab aan kala-sooc lahayn, oo saamaxaya in laga baaqsado dhibaato aan loo baahnayn oo ku iman karta danaha maaliyadeed iyo kuwa dhaqaale ee maalgashatada iyo maalgashigooda.

## CUTUBKA 4AAD

### QARAMAYNTA

#### Qodobka 13aad

#### Qaramayn (Expropriation)

- 1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lama wareegayso mana qaramaynayso hanti maalgashade shisheeye, kumana qasbayso maalgashadaha inuu hantidiisa maalgashi uga tanaasulo, si toos ah ama si dadban. Hadii looga maarmi waayo hantida maalgashadaha isticmaalka dan guud (Public Purpose, oo ay cadeeyen ha'adaha ku shaqada leh si aan kala sooc-laheyn (Non-discriminatory Manner) waala qarameyn karaa iyada oo la bixinayo magdhaw sugan oo ah qiimaha hantida lagala wareegay.
- 2) Magdhawgaas waa inuu u qalma qiimaha suuqa waqtiga la qameeyay (taariikhda qaramaynta), ama isla waqtiga wargalinta, haddii ay qiimaha hantida saamayn silloon ku yeelatay wargalinta qaramaynta la dul-dhigay. Tilmaamaha lagu qiimaynayo waxaa ka mid ah, qiimaha hantida haddii ay sii shaqaynayso, qiimaynta guud ee hantida oo ay ku jirto qiimaynta rasmiga ah ee canshuurta hantida la taaban karo, iyo tilmaamihii kale ee haboon, si loo xaqiijiyo sicirka suuqa ee macquulka ah, kadib qiimeynta qiimo-dhaca ku yimaada qalabka maalgashi ee la qiimeynayo. Magdhawgu waa in lagu bixiya muddo aan ka badneyn 120 maalmood.
- 3) Maalgashatada hantidooda la qameeyay waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka-doodan habraaca qiimeynta qarameynta, si waafaqsan Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, taas oo dib loogu eegayo kiiskiisa iyo qiimaynta maalgashiga si waafaqsan Mabaadi'da ku xusan cutubkan.
- 4) Hadii ay dhacdo cabasho ku aaddan qarameyn dadban, maalgashaduhu waxa uu xaq uleeyahay in uu cabashadaas u gudbiyo xafiisyadda qaran ee xalinta Khilafaadka ee la xiriira maalgashiga ama hay'adaha garsoorka dalka.
- 5) Hadii ay dhacdo cabasho ku aaddan qarameyn dadban, maalgashaduhu waxa uu xaq uleeyahay in uu cabashadaas u gudbiyo xafiisyadda qaran ee xalinta Khilafaadka ee la xiriira maalgashiga



ama hay'adaha garsoorka dalka.

### **Qodobka 14aad**

#### **Awoodda soo-saarista xeernidaamiye (Sovereign Right to Regulate).**

Wasiirka Wasaaradda, isaga oo latashanaya hay'adaha ay kala dhaxeeyso hawlaha maalgashiga ee dowladda, waxa uu soo saarayaa xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan gelinayo qodobbada sharcigan.

### **CUTUBKA 5AAD**

#### **MAARAYNTA CABASHADA IYO XALLINTA KHILAFAADKA**

### **Qodobka 15aad**

#### **Maaraynta Cabashooyinka (Grievances Management)**

- 1) Wasiirka waxa uu magacaabi karaa Guddiyo farsamo oo maareeya cabashooyinka la xiriira dhinacyada maalgashiga kahor inta aysan gaarin heer garsoor.
- 2) Hadii ay cabasho timaado, Maalgashaduhu wuxuu cabashada u soo gudbinaya Guddiyada ku xusan qodobkan farqadiisa 1aad.
- 3) Guddiyada ku xusan qodobkan farqadiisa 1aad wuxu qiimaynayaa arrintan, waxuuna ku dhaqaaqayaa talaabo kasta oo ay u arkaan inay macquul tahay si loo gaaro xal sharciga waafaqsan oo ay ku qancaan dhammaan dhinacyada.
- 4) Guddiyadu waa in ay cabashada si rasmi ah loogu soo gudbiyay go'aan uga gaaraan muddo 30 maalmo shaqo gudahood. Hadii dhinacyada midkood ku qanci waayo wuxuu cabashadiisa u gudbisan karaa hay'addaha garsoorka sida ku cad Qodobka 16aad ee sharcigan.
- 5) Guddigu waa inuu xafidaa xogta, macluumaadka iyo qoraallada ay maalgashatada u soo gudbiyaan.
- 6) Xeer-nidaamiye gaar ah ayuu Wasiirku ku soo saaraya habraacyadda loo marayo maareynta cabashooyinka la xiriira maalgashiga.

### **Qodobka 16aad**

#### **Xallinta Khilaafaadka**

- 1) khilaafaadka maalgashi ama khilaafaadka la xiriira fasiraadda sharcigan ee ka dhax-dhasha dhinacyada maalgashiga waxaa si deg deg ah oo hufan loogu xalinayaa wadatashi iyo wadahalal dhax-mara dhinacyada si waafaqsan qodobka 15<sup>aad</sup>.
- 2) Haddii xal togan laga gaari waayo, dhinacyada maalgashiga waxay xaq u yeelanayaan inay cabashadooda u gudbiyaan hay'adaha garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- 3) Dhinacyadu hadii ay ku qanci waayaan go'aannada garsoorka dalka, waxa ay u gudbin karaan khilaafkooda xarumaha caalamiga ah ee xalinta khilaafaadka Maalgashiga oo ay Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya xubin ka tahay sida;
  - I. The International Center for Settlement of Investment Disputes (ICSID) (Convention Arbitration);
  - II. The Additional Facility of ICSID (if Convention Arbitration is not available)
  - III. The Arbitration Rules of the United Nations Commissions for International Trade Law (UNCITRAL Rules);
- 4) Go'aannada ka soo baxo xarumaha ee qodobkan faqradiisa 3<sup>aad</sup> ku xusan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay dhaqangelisaa.



**CUTUBKA 6AAD**  
**QODOBO ISKU DHAFAN**

**Qodobka 17aad**  
**Xeer-Nidaamiyayaasha**  
**(Regulations)**

Wasiirku waxa uu soo saaraya xeer nidaamiye lagu hirgelinayo sharcigan si loo gaaro u-jeedooyinkiisa.

**Qodobka 18aad**  
**Iska-Hor-imaadka Sharciyada**

Haddii ay dhacdo in ay iska hor yimaadan qodobada sharcigan iyo qodobo sharci kale oo la xidhiidha maalgashiga, qodobada sharcigan ayaa mudnaanta yeelanaya.

**Qodobka 19aad**  
**Qodobbada Kala-guurka**

- 1) Maalgashiyada jira ee ku salaysan Heshiisyo Maalgashi oo Laba-geesood ah ama ka badan ka hor dhaqangalka Sharcigan waa la dhawrayaa ilaa iyo muddada ay ku egyihiin, si waafaqsan shuruudaha heshiisyadaas.
- 2) Maalgashi kasta oo la sameeyo dhaqan galka sharcigan kadib waxaa lagu dhaqayaa sharcigan.
- 3) Si waafaqsan shuruucda dalka iyo xeerarka caalamiga ah, Dowladaha xubnaha ka ah DFS ma gali karaan heshiis maalgashi oo aysan qeyb ka aheyn DFS.

**Qodobka 20aad**  
**Dhaqangalka Sharciga**

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka BJFS, saxiixana Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

